


**Tijaabaada la Isku-dubbariday ee
Warqadda Doorashada Magaalada
iyo Dagmada Denver, Colorado
Talaado, Noofambar 7, 2023**



**Xaafad Nooca Tijaabada: Tijaabo
Nooca Warqada doorashada: Isku darka**


Paul D. López
Karaani iyo Diiwaan galiye
Secretario y Registrador



Si aad ugu codayso musharax la magacaabay, gabi ahaan u buuxi goobaabinta dhanka midig ee dookhaaga. Isticmaal khad buluug mise madow ah.



Si aad u saxdo tartanka ay ku tartamayaan in ka badan hal musharax, dhex mari xariiq tikh ah goobaabinta iyo magaca sida khaldan loo calaamadeeyay, ka dibna ku buuxi goobaabinta ku xigta macaga saxda ah

DIGNIIN: Qof kasta oo, adeegsanaya xoog mise xaalado kale, si aan habboonayn uga dhaadhiciya inuu hab gaar ah u codeeyo mise uu ka joojiyo inuu codeeyo, mise si been abuur ah u sameeyo, baddalo, been-abuuro mise been-abuur ku sameeya warqad kasta oo codeyn ah kahor mise codeynta ka dib, burburiya, tirtiya wajiga musharraxa, jeexa, mise wax kudara mowduuca warqada doorashada, wuxuu mutaysanayaa marka la xukumayo, xarig, mise ganaax, mise labadaba. Qeybta 1-7.5-107(3)(b), C.R.S.

**Dugsiyada Dadweynaha Denvor
(Dugsiga Dagmada Lambar 1)**

Agaasinka At-Large

(Mid u Codee /)

- Brittni Johnson
- John Youngquist
- Kwame Spearman
- Paul Ballenger

Agaasinka Dagmada 1

(Mid u Codee /)

- Scott Baldermann
- Kimberlee Sia

Agaasinka Dagmada 5

(Mid u Codee /)

- Marlene DeLaRosa
- Adam Slutzker
- Charmaine Lindsay

Nooca Tijaabada

Weydiimaha Waraaqda Codbixinta Gobolka Colorado

Weydiimaha waraaqda cod bixinta ee uu soo gudbiyo golaha guud mise qayb hoosaad kasta oo siyaasadeed waxay ku qoranyihiin warqad, oo weydiimaha waraaqda cod-bixinta ee ay bilaabeen dadku waxay ku taxanyihiin tiro ahaan. Weydiimaha waraaqda cod bixinta ee loo taxay sida “wax ka baddal” waxay soo jeedinaysaa isbaddal lagu sameeyo distoorka Colorado, iyo weydiimaha waraaqda cod bixinta ee loo taxay “talo” waxay ku talineysaa isbaddalka Xeerarka Dibu Eegista Colorado. Codbixinta “haa/la jira” ee weydiin kasta ee waraaqda cod bixineed waa cod bixin lagu taageerayo baddalka sharciga mise duruufaha hadda jira, iyo “maya/ka-soo horjeeda” weydiin kasta ee cod bixineed waa cod ka soo horjeeda baddalka sharciga mise duruufahah hadda jira.

Latalinta HH (SHARCIYEED)

Haddii qaranku dhimto canshuuraha guryaha iyo ganacsiyada, oo ay ku jirto balaarinta canshuur dhaafka guryaha ee waayeelka, oo ay dhammeystirto ismaamullada, biyaha dagmooyinka, dabdamiska dagmooyinka, ambalaasta iyo cusbitaalka dagmada, iyo dawlada hoose ee kale islamarkaana maalgaliso dugsiyada dagmooyinka iyadoo la isticmaalayo qeyb kamid ah dakhliga dawladda ilaa xaddiga HH sida lagu qeexay cabbirkan?

HAA/LA JIRA -

MAYA/KASOO HORJEEDA -

Latalinta II (SHARCIYEED)

Iyadoo aan canshuurta sare loo qaadin, qaranku ma hayn karo oo kuma kharash gareeyo dakhliga canshuurta sigaarka, tubaakada, iyo waxyaabaha kale ee nikotiinka leh misena ilaaliyo heerka cashuurta sigaarka, tubaakada, iyo waxyaalaha kale ee nikotiinka leh islamarkaana dakhligaas u isticmaala inuu ku maalgaliyo saddex iyo labaatan malyuun iyo lix boqol iyo konton kun oo doollar si loo xoojiyo barnaamijka iskaa wax u qabsada ah ee Colorado ee dugsiga barbaarinta oo laga dhigo mid si weyn loo heli karo si bilaash ah halkii laga dhimi lahaa heerarkan canshuurta iyo dibu soo celinta dakhliga jumlada sigaarka, qaybiyayaal alaabooyinka tubaakada, qaybiyayaasha alaabada nikotiinta, iyo canshuur bixiye yaasha kale, si loo dhaafo qiyaasta lagu daray buug yaraha macluumaadka codbixinta soo jeedin EE?

HAA/LA JIRA -

MAYA/KASOO HORJEEDA -

Weydiimaha Waraaqda Codbixinta Magaalada iyo Degmada Denver

Weydiimaha Lagudbiyay 2P

Iyadoo aan sare loo qaadin canshuuraha dheeraadka ah, codbixiyaha uu ansixiyay boqolkiiba ebar dhibic hal shan (0.15%) iibka iyo isticmaalka cashuurta loo qoondeeyay maalgalinta Barnaamijka Dugsiga barbaarinta ee Denver, oo loo dajiyay inuu dhacayo Diisambar 31, 2026, si joogto ah ayaa loo ballaarin doonaa ilaa awooddan laga gaarayo wax ka baddaleen mise tirtireen Golaha Magaalada Denver mise codbixiyayaasha Denver?

HAA/LA JIRA -

MAYA/KASOO HORJEEDA -

Nooca Tijaabada